



Faafin Rasmiga ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muqdisho, 1 Nofembre 1974

L. 11

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Gotaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka ja weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaas Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 39, Tr. 1 Oktoobar 1974 — Beddelaad Xeer iyo Kordhin.

Bog. 501

SHARCI L. 40, Tr. 3 Oktoobar 1974 — Wax ka beddelid sharciga Maxkamadda Badbaadada Dalka Sharci L. 3 ee 10kii Jan. 1970.

» 502

SHARCI L. 41, Tr. 3 Oktoobar 1974 — Wax ka beddelid sharciga tirsigiisu yahay 12 ee soo baxay 26 Sebt. 1964 ku saabsan Macaamilka Dhaqaale oo lala yeesho Dibedda.

» 503

SHARCI L. 42, Tr. 5 Oktoobar 1974 — Meelmarin Heshiis.

» 504

BOGGA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 1 Agoosto 1974, L. 115 — *Bilaad Qalin
ah oo Hawlkarnimo oo lagu xusuusto G. Dh. Daahir
Maxamed Diiriye.*

Bog. 505

DECREE OF THE PRESIDENT OF THE SUPREME RE-
VOLUTIONARY COUNCIL, No. 116 — *Amendment
by Local Government Service Regulation No. 4 of 15th
July 1973.*

» 506

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 1 Oktoobar 1974, L. 117 — *Xeer Daw-
ladeed ku saabsan Diiwaan - Gelinta Iskaashatooyinka
Ganacsiga.*

» 508

XEER WASAARADDA ARRIMAHAGUDAHA, Tr. 1 Jen-
naayo 1974, L. 118 — *Degmooyin laga wareejiyey Dara-
Jada (C) loona wareejiyey Darajada (B).*

» 513

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 9
Oktoobar 1974, L. 119 — *Qiimaha Burka Dalka baxa.*

» 514

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Mar-
so 1974, L. 120 — *Siiismo Dhul Dawladeed la siiyey
Sheekh Cali Maxamed Cusmaan.*

» 515

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Agoosto
1974, L. 121 — *Dhul gatay Sacida Xaaji Diriye Xirsi
Ku fadhiya mq. 2,600, kuna yaal Magaalada Xamar
Jidka Afgooy.*

» 516

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Agoosto
1974, L. 122 — *Dhul gatay Jaalle Ismaaciil Xaaji Maxa-
med Muuse, kuna yaal Muqdisho, Valle Nord mq. 900.*

» 518

BOGGA SEDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul
Jaalle Xaaji Cumar Maxamuud Weheliye. (230)

Bog. 519

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul
Jaalle Jibriil Cali Xuseen. (231)

» 519

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cabdullahi Cilmi Ceynaan.</i> (232)	» 232
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Faadumo Cabdi Cabduraxman.</i> (233)	» 520
MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO, Ogeysiis Lumid Jeed L. 1312-7, — <i>Xasan Cabdi Maxamed.</i> (234)	» 521
MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Ogeysiis Lumid Buug L. 648-7 — <i>Cult Xuaji Maxamed Axmed.</i> (235)	» 521
BOLIMOG S.p.A. — <i>Avviso di convocazione di Assemblea Generale Ordinaria.</i> (522 Bis)	» 522

SHARC L. 38, Tf. 1 Oktoobar 1974.

Beddelaad Xeer iyo Kordhin.

**MADAXWEYNAYA
GOLOHA SARE EE KACAANKA**

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

MARKUU FIRO U LAHAADAY Soo jeedintii Xoghayaha Wasaa-radda Gaashaandhigga ee khuseeyneysa in wax laga beddelo Xeerka Ci-qaabta. Ciidammada ee Nabadda;

GO' AAN

Qodobka 1aad

Dembiga ah fogaasho sharcidarro ee qod. 131 ciqaabtisu waa illaa 2 Sannadood;

Qodobka 2aad

Dembiga ah baxsasho ee qod. 132 ciqaabtiisu waa illaa 10 Sannadood;

Qodobka 3aad

Sifatalaha dembiga cusleeya

Sifaalahaa soo socda waxaay cusleenayaan dembiga ah baxsasho:

- b) Haddii qofka baxsaday uu yahay Sarkaal Sare ee Ciidammada;
- t) Haddii qofka baxsaday uu markaa hayay mas'uuliyyad weyn;
- d) Haddii qofka baxsaday uu shaqo lnbedda u joogay;
- x) Haddii qofka baxsaday u gudbo Waddan colaadi naga dhexeeyse;
- kh) Haddii qofka baxsaday mu shaqo ka galoo Waddan colaadi naga dhexeeyse;

Qodobka 4aad

Dembiga ah amar diido ee qod. 157 waxaa loo beddelay sida soo socota:

1. Qofkii ka mid ah Ciidammada ee diida, ama aan fulin, ama daahiya amar ku saabsan shaqo, ama asluubta, amarkaas uu siiyey qof ka daraja Sarreeya waxaa lagu ciqaabayaa illaa 5 Sannadood.

2. Haddi falku uu dhaco hawl la hayo, ama Markab iyo Dayuurad Dhexdood wuxuu muteysanayaa ciqaab ah illaa 5 Sannadood, waxaa la gaarsiin karaa ilaa 7 sannadood, hadpii falku uu ka dhaco meel dab ka kacay (incendio), ama meel cudur faafayo (Epidemia), ama halisuba jirto.

Qodobka 5aad

Qofkii ka mid ah Ciidammada ee isku dhiga gaari uu qof Madax ahi saaranyahay waxaa lagu ciqaabayaa illaa 3 Sannadood.

Qodobka 6aad

Go'aankan wuxuu dhaqan galayaan markuu ku soo baxo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Oktoobar 1974;

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaalle S. G. Maxamed Cali Samantar
Xoghayaha Wasaaradda Gaashaandhigga

SHARCI L. 40, Tr. 3 Oktoobar 1974.

Wax ka beddelid sharciga Maxkamadda Badbaadada Dalka Sharci L. 3 ee 10kii Jannaayo 1970.

GUDDONSHABA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Xeerka tirsigiisu yahay 3 soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii;

MARKU TIXGELIYEY Sharciga lagu dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka;

MARKUU OGAADAY Baahida loo qabo in la ilaaliyo Ulajeedoo-yinka Kacaanka;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka G. S. K. iyo Golaha Xogha-yavaasha Dawladda;

WUXUU GUDDOOMIYHEY

Qodobka 1aad

In qodobka 6aad xarafka « a » ee Xeerka tirsigiisu yahay 3 soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii lagu daray dembiyada ka soo horjeeda Maamulka Guud (delitti contro la Pubblica Amministrazione) kuna xusan qodobbada 257, 265, 266, 267, 269, 271, 272, 273, 274, 280, iyo 281 ee Xeerka Ciqaabta iyo Qodobka 259 Xeerka Ciqaabta oo lagu beddelay qodobka 1aad Sharciga tirsigiisu yahay 41 soona baxay 1dii Juun 1972kii.

Qodobka 2aad

Dhammaan dacwooyinka ku saabsan qod. 1aad ee Sharcigan oo horyaal Maxkamadaha Caadiga ah oo aan weli lagu dhammeyn Xukun aan laga dambeyn (Sentenza irrevocabile), waxaa awood u leh loona wareejin doonaa Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Qaybaheeda.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan geli doonaa, markii lagu soo siiro Faafinta Rasmiga ah, waxaana lagu dari doonaa Xeerarka Dawladda.

Muqdisho, 3 Oktoobar 1974.

GUDDONSHAH
S. G. Maxamed Siyaad Barre
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 41, Tr. 3 Oktoobar 1974.

Wax ka beddelid sharciga tirsigliisu yahay 12 ee soo baxay 26 Sebt. 1964 ee ku saabsan Macaamilka Dhaqaale oo lala yeesho dibedda.

GUDDOONSHAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Kowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;
MARKUU Sharciga lagu dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka;
MARKUU ARKAY Xeerka T. Y. 12 ee soo baxay 26-9-64 oo ku saabsan macaamilka dhaqaale oo lala yeesho dibedda;

MARKUU ARKAY Qod. 26aad ee Xeerkaas la soo sheegay oo ka haddaya macaamil aan loo haysan oggolaansho ama shati oo lala sameeyo dibedda;

MARKUU TIXGELIYHEY in qodobkaas la soo sheegay uu si gaar ah u taabanayo danta dadweynaha iyo dhaqaalaha waddanka;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka G.S.K. iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU GOOYEY
Qodobka 1aad

In dembiga ku xusan Qod. 26aad ee Xeerka T. Y. 12 soo baxay 26-9-1964 kuna saabsan macaamilka dhaqaale oo dibedda lala yeesho iyadoo aan loo haysan oggolaansho ama shati, laga dhigo hawsha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo qaybaheeda Gobbollada;

Qodobka 2aad

Dhammaan dacwooyinka ku saabsan qodobka aan soo sheegnay oo horyaal Maxkamadda Caadiga ah welina aan lugu dhameyn xukun aan laga dambeyn (Sentenza Irrevocabile), waxaa lugu soo wareejinaya Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Qaybaheeda Gobollada.

Qodobka 3aad

Sharcigaanu wuxuu dhaqan gelayaa markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Oktoobar 1974.

GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. G. Jaalle Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 42, Tr. 5 Oktoobar 1974.

Meelmarin Heshiis.

GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO MAQLAY Golaha Xoghayayaasha Dawladda;
ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU XEERAY SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad
Meelmarin Heshiis

Heshiiska ku saabsan dhismaha Sharikadda Horumarinta Beeraha ee xidhan (Siyaadko) ee dhexmaray Wasaaradda Qorshaynta iyo Iskuduwidda ee Soomaaliya iyo Wasaaradda Beeraha ee Ciraaq bishii Juulay 7deedii 1974 ayaa halkan lagu xeeriyeey.

Qodobka 2aad
Dhaqan Gelin

Sharcigani dhaqso ayuu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Oktoobar 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre
GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaalle Ibraahim Meygaag Samater
Xoghayaha
Wasaaradda Qorshaynta iyo Midaynta

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 1 Agoosto 1974, L. 115.
Billad Qalin ah ee Hawlkarnimo: Xusuusta Gaash. Dhexe Daahir Maxamad
Diiriye.

GUDDOOMIYAH GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Koowaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee 21kii Oiitoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 65 ee 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU OGAADAY in Gaashaanle Dhexe Daahir Maxamad Diiriye, Guddoomiyihii hore ee Gobolka Bari, uu ahaa qof hawlkarnimo, daacadnimo iyo kacaannimo ku tilmaaman, kana hirgeliyay Gobolka Bari hawlo horumar leh, isagoo dhibaatooy Gobolku gaar ahaan u leeyahay kaga hortagay niyad iyo xamaased dhaafsiisan kartida qofka caadiga ah, suura geliyayna inay beenowdo fikraddii laga haystay Gobolka Bari oo ahayd wax horumar aha inaan laga soo saari karin;

MARKAY CADDAATAY in Gaashaanle Dhexe Daahir Maxamad Diiriye uu u geeriyyooday cudur ka soo gaaray hawlihii adkaa ee uu ka qabtay Gobolka Bari;

MARKUU AQOONSADAY lagama maarmaan in ay tahay in la maamuusa qof kastoo geeriyyoda ama dhibaato gaarta isagoo si gaar ah oo aqoonsi mudan u gudanaaya xilkiisa;

MARKUU TIXGELIYAY go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha;

WUXUU GUDDOMIYAY

Xeerka soo socda:

Qodob keliya

Waxaa lagu maamuusay xusuusta (alla meomria) Gaashaanle Dhexe Daahir Maxamad Diiriye Billad Qalin ah ee Hawlkarnimo.

Muqdisho, 1dii Agoosto 1974.

GUDDOOMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

DECREE OF THE PRESIDENT OF THE SUPREME REVOL. COUNCIL

No. 116, of 5 September 1974.

Amendment Local Government Service Regulation No. 4 of 15th July 1973.

**THE PRESIDENT
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL**

HAVING SEEN the first and second Charters of the Revolution and also Law No. 1 of 21st October 1969;

HAVING SEEN Law No. 52 of the 8th June 1972 (Local Government Reform Law);

HAVING SEEN Law No. 29 of 1st April 1970;

HAVING SEEN the regulation No. 4 of 15th July 1973 (Local Government Service Regulation);

ON THE PROPOSAL of the Secretary of State for Interior;
CONSIDERING it necessary to amend the above regulation.

HEREBY DECREES

Article 1

Article 1 (a) of the above regulation is modified as:

- a) «Appointing authority» means the authority by the Degree of which the appointment is made.

Article 2

Article 12 (3) of the above regulation is modified as:

3. The Staff Committee of the Regional Revolutionary Council shall with the approval of the Chairman of the Council make promotions to grades 4 of Division « C ». The Staff Committee of the District Revolutionary Council may send through the Chairman or the Regional Executive Secretary any recommendations for promotions other than those for which the approval of President is necessary and on receipt of these recommendations the Regional Executive Secretary shall place them before the Committee for their consideration provided the prior concurrence of the chairman of the Regional Revolutionary Council is obtained. The District Revolutionary Council may make promotions within division « D » without reference to the Regional Revolutionary Council.

Article 3

Article 26 (2) of the above regulations is modified as:

2. The penalties specified in clauses (a) and (b) in article 26 (1) above shall be deemed to be minor penalties while those specified in clauses (d), (e), (f), (g) and (h) of the said Article shall be deemed to be major penalties. The penalty specified in clause (c) above, shall be re-

garded a minor penalty if the loss involved is not more than one hundred shillings and shall be considered a major penalty if the loss involved is more than one hundred shillings.

Article 4

Article 27 (2) of the above regulation is modified as:

2. Minor penalties may be imposed by the Chairman or the Secretary but major penalties shall be imposed by the staff Committee subject to the approval of the Secretary of the State for staff appointed by the President.

Article 5

Article 31 (2) of the above regulation is modified as:

2. A staff member may withdraw his resignation at any time, before it is accepted.

Article 6

Schedule III para 1 (a), (b) and para 3 (s) of the above regulation is modified as:

Offences involving minor penalties shall be dealt with in the following manner:

1. A fine may be imposed on a staff member on disciplinary grounds by any of the following authorities:
 - a) the Secretary of State in respect of all Local Government staff;
 - b) the Director-General or the Director of Local Government in the Ministry of Interior in respect of all staff of Local Government;
3. s) the chairman or a member of the Committee shall be disqualified from sitting on the Committee during the proceeding of a case in which he is or is likely to be an interested party and he shall be considered an interested party if he is a witness in the case.

Article 7

This Decree shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin.

Muqdisho, 5 September 1974.

Jaalle Major Gen. Mohamed Siad Barre
PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council

Jaalle Major Gen. Xusen Kulmiye
Secretary of State for Interior

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 92.

Mogadiscio, 14 Ottobre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 1 Oetoobar 1974, L. 117.

Xeer Dawladeed ee ku saabsan Diiwaan-Gelinta Iskaashatooyinka Ganacsiga.

GUDDOMIYAH GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimuqradiiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4tili Oktoobar 1973kii iyo lifaaqiisa;

ISAGOO AQQONSAN In ay lagama maarmaan tahay in la sameeyo hab ku saabsan Diwaan gelinta Iskaashatooyinka Ganacsiga. Si uu u hirgaloo Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka;

ISAGOO TIXGELINAYO Go'aankii Golaha Sare ee kacaanka iyo kan Xoghayayasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Xeer Dawladeedka hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Arji diwaan gelin

1. Guddoomiyaha Iskaashatada Ganacsiga waa inuu arji diiwaan gelin ah uu qorto Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga Gudaha. Arjigaas waa inu soo marsiyyaa Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada iyo tan Gobolka ee shaqada ku leh, sida uu dhigayo lifaaqa kowaad ee Xeerkana.

Diiwaanka waxaa la gelinaya Iskaashatooyinka cusub iyo kuwa hore u jiri jirayba, iyadoo la raacayo nidaamka hoos ku qoran:

- a) Iskaashatooyinka Ganacsiga ee cusub waa inay diiwaan gelin weydiistaan 30 (Sodon) maalmood dhexdood ka dib markii la dhisay.
 - b) Iskaashatooyinka Ganacsiga ee hore uu jiray inta aan dhaqan gelin Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee soo baxay 4-10-1973 waa inay diiwaan gelin weydiistaan 30 (Sodon) maalmood ka dib markii xeerkani lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
2. Arjiga lagu codsanayo Diiwaan gelinta, oo ku qoran xaashida 3da shilin ah waa in lagu soo lifaaqaa:
 - a) qoraalkii aas-aasidda ee Shirka Guud, ayadoo ay la socoto liis ay ku qoran yihiin magacyada dadka xubnaha ka ah Iskaashatada oo markaas ka qayb galay iyo natijjada codka ey dhhibeen.
 - b) liis ey ku qoran yihiin magacyada xubnaha Iskaashatada iyo meesha laga helo iyo magacyadda dadka loo doortay Agaasinka, Guddiga Hantidhowrka iyo Xisaabaatka iwm.

- t) Afar nuqlu oo Xeer-Gaarka ah oo waafaqsan sharcigan Iskaashatooyinka ee lambarkiisu yahay 40 soona baxay 4-10-73 iyo tilmaamooyinka uu soo saaro Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga Gudaha.

Leergaarka ee Iskaashatada Ganacsiga waa inuu saxiixo qofkasta oo ka mid ah Guddiga Agaasinka.

Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada waa inuu goob joog ka noqdo saxiiidda xeer gaarka iskaashatada, asagoo goob joognimadaas ku muujinaaya saxiixa iyo shabbadda Xafiska Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada.

Qodobka 2aad

Habka Diiwaan gelinta

1. Haddii Xeer-gaarka iyo qoraalka aas-aasida Iskaashatada ay waafaqsan yihii sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, oo dhaqan galay 4tii Oktoobar 1973, lifaaqiisa iyo habka xeer-gaarka oo Wasaaradda Ganacsiga Gudaha soo saartay Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada, asagoo ra'yigiisa ka dhiibanaaya ayuu u soo gudbinayaa warqadaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka.

2. Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka ka dit markuu baaro in Iskaashatadaasi ay waafaqsan tahay Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka, wuxuu ogolaanshihiisa u soo gudbinayaa Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga Gudaha.

3. Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga Gudaha wuxuu diiwaan gelinayaa Iskaashatada Ganacsiga, asagoo tixgelinaya dardarankii iyo ogolaanshihi Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka iyo kan Degmadaba, ka dib markuu uu baaro in Iskaashatadaasi ay waafaqsan tahay Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka.

4. Iskaashatada Ganacsiga waxay yeelanaysaa aqoonsi khaas ah, oo sharci ku dhisan, marka laga bilaabo maalinta diiwaan gelinteedu ku soo baxdo «Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda».

Qodobka 3aad

Isbedelka Iskaashatada

Haddii Xeer-Gaarka, ama dadka loo doortay Guddigaasha ee Iskaashatada Ganacsiga wax laga bedelayo, Guddoomiyaha Iskaashatadaasi waa inuu durhaba soo ogevsiyaa, iyadoo qoran. Guddiga Iskaashatooyinka

Qodobka 4aad

Ilaalinta diiwaanka Rasmiga ah

Xajiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga wuxuu haynaya Diiwaan Rasmiga ah ee lagu qoro Iskaashatooyinka Ganacsiga oo ka dhismay Dadka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, lehna aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan.

Qodobka 5aad

Dhaqan gelinta

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo qoro «Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda».

Muqdisho, 1 Oktoobar 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. G. Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga Gudaha
Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud

LIFAAQA 1aad

ISKAASHATADA

TUULADA

DEGMADA

GOBOLKA

Ku / Socota:

Jaalle Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga Gudaha

XAMAR

Sii Maraysa:

Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada iyo tan Gobolka.

UJeeddo: Arji Diiwaan Gelin.

Annagoo tixraacayna Sharciga Lamb. yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, oo dhaqan galay 4tii Oktoobar, sannadkii 1973dii qodobkiisa 15aad. iyo kan 3aad ee lifaaqa sharciga, waxaan idin ka codsanaynaa inaad nagu qortaan Diwaanka Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga Gudaha.

Waxaan arjigaan ku soo lifaaqaynnaa:

1. 4 (afar) nuqul ee Xeer-gaarka oo uu ogolaaday Shirka Guud ee Iskaashatada; waafaqsanaa sharciga Iskaashatooyinka ee Lambarkiisu yahay 40, soona baxay 4-10-73 iyo tilmaamooyinka uu soo saaray Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga Gudaha;

2. Qoraalkii aas-aasidda ee shirkha Guud, ayadoo ay la socoto liis ku qoran yihiin magacyada dadka xubnaha ka ah Iskaashatada iyo dadka loo doortay Guddiyaasha Iskaashatada.

Mahadsanid.

Taariikhda

Guddoomiyaha

Iskaashatada

LIFAAQA 2aad

JAMHUURIYADDA DIMOQRADIGA SOMALIYA
WASAARADDA GANACSIGA GUDAH

Ujeedo: **Shahaado Diiwaan gelin.**

MAGACA ISKAASHATADA
TUULADA
DEGMADA
GOBOLKA
SHAQADA AY QABATO ISKAASHATADA
LAMBARKA DIIWAANKA
TAARIIKHDA DIIWAANKA LA GELIYEV

Iskaashatada kor ku magacaaban waxaa laga diiwaan geliyay Xafii-ska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga Gudaha, taas oo waafaqsan qodobka 15aad ee sharciga Lamb. yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqradiiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4tii Oktoobar sannadkii 1973.

Marka laga bilaabo maanta oo bisha ay tahay.....
Iskaashatadan waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan; Xeer-Gaarkeedana wuu dhaqan-gelayaa.

XOGHAYAHA DAWLADDA

XEER WASAARADDA ARRIMAHAA GUDAHAA

Tr. 1 Jannayo 1974, L. 118.
Degmooyin laga wareejiyay Darajada (c) loono wareejiyey Darajada (b).

WASAARADDA ARRIMAHAA GUDAHAA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka
21 Oktoobar 1969kii!

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkisu yaha 52 ee 8dii Juun kuna
saabsan maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Lambarkisu yahay 11527, Taariikh
15-11-1972 ee lagu sameeyay qaybaha Derejooyinka Degmooyinka;

ISAGOO OGAADAY In Degmooyinka B. Xaawo, Badhaadhe, Ood-
weyne, Afmadoow, iyo Buuhodle, ay muujiyeen horumar xagga dhaqaalaha,
sidaas daraaeed ay tahay lagama maarmaan in Degmooyinka laga
wareejiyo qaybta (c) laguna wareejiyo qaybta (b).

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta 1-1-1975, Degmooyinka; B. Xaawo, Badhaadhe, Ood-
weyne, Afmadoow iyo Buuhodle, waxaa laga wareejiyay qaybta Derejada
(c) waxaana loo wareejiyay qaybta Derejada (b).

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal.

Xeerkani Bisha 1-1-1975 ayuu dhaqan gelayaa waana in lagu qoro
Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
S. G. Xuseen Kulmiye Afrax

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 90.

Mogadiscio, li 25 Settembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

XEER WASAARADDA ARRIMAHAD GUDAHAD

Tr. 9 Oktoobar 1974, L. 119.
Qiimaha Burka Dalka ka soo Baxe.

WASAARADDA GANACSIGA GUDAHAD

MARKII UU ARKAY Go'aankii 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka
21kii Oktoobar 1969;

MARKII UU ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 17ka oo soo ba-
xay 17-6-1967, kuna saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maar-
manka ah;

MARKII UU ogaaday in loo baahan yahay in qimo loo gooyo Burka
dalka ka soo baxa.

MARKII UU maqlay Guddiigii logala tashanaayey ilaalinta siciirka
alaabta lagama maarmarka ah.

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Burka dalka ka baxa waxaa Wakaaladda Ganacsiga Ummadda ku
gadanaysaa kiiladii Sh. So. 1,90 (hal shilin iyo Sagaal shan senti); kin-
taalkiina Sh. So. 190 (Boqol iyo Sagaashan).

Qodobka 2aad

- b) — Burka dalka ka soo baxa waxaa laga gadi karaa Wakaaladda Ganacsiga Ummadda oo keliya;
- t) — kiishka Burka lagu shubayo waxaa la imanaysa Wakaaladda Ganacsiga Ummadda;
- j) — Kharashka Xamaaliga waxaa bixinaysa Wakaaladda Ganacsiga Ummadda;
- z) — Qiimaha Burka dalka ka baxa ee Wakaaladda Ganacsiga Ummadda ay kaga gadayso Dawladda Hoose, kan D. Hoose Du-kaanleyda kaga gadayso iyo kan dadweynaha lagaga gadayaa waa sida Burka kale lagu gado.

Qodobka 3aad

Xeerkhan waxuu dhaqan geleyaa durbaba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa lagu amrayaa qof waliba inuu dhowro, ilaaliyana hirgelinta Xeerkhaan isaga ah.

Muqdisho, 9 Oktoobar 1974.

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 10 Maarsa 1974, L. 120.
Siismo dhul Dawladeed la siyey Sheekh Cali Moxamed Cosmaan

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Xashaddi Kowaad iyo tii labaad ee ka-caanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 41 taarikhdeeduna aheyd 13 Septembre 1973;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeeduna aheyd 9 Jennayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Sheekh Cali Moxamed Cosmaan taarikhdeeduna aheyd 2-5-1963, Muqisho, Xafadda Wardhiglay;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna dhaabacay hasihda rasmiga ah ee Dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY Oglolanshii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 1266 bishii 30 Marso 1967, soona gudubtay fadhigii 1°aad ee 3 Feb. 1968;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu yihiin L. 100798 ee 24-3-68 iyo L. 118494 ee 23-12-73, in Jaalle Sheekh Cali Moxamed Cosmaan uu dhibay Xafiiska Canshuurta Dabban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 994, oo ah qimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarteda yahay MWD-439-349-68 taarikhdeeduna aheyd 8-1-74, in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiyaa mdh. 494, Xafadda Wardhiglay;

ANNAGOO ARAGNAY Arjga labaad (2) u soo qortay Sheekh Cali Moxamed Cosmaan taarikhdeeduna aheyd 5-3-1973, Muqdisho, Xafadda Wardhiglay;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey Xafiiska ku shaqada lahaa, laguna dhaabacay xashida rasmiga ah ee Dawladda,

ANNAGOO ARAGNAY Oglolanshii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 11766 bishii 3-12-1973, soona gudubtay fadhigii 12°aad ee 11-12-73;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 126167 taarikhdeeduna aheyd 19-1-74 in Jaalle Sheekh Cali Moxamed Cosmaan uu dhibay Xafiiska canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 514,15, oo ah qimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarteda yahay WHG-3-23-47 taarikhdeeduna aheyd 10-1-1974 in ninka kor ku magacaabaa la siiyey dhul ku fadhiyaa mq. 342,72, Xafadda Wardhiglay;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cali Moxamed Cosmaan la siiyay dhul Dawladeed ee ku fadhiyaa mq. 836,72, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Wardhiglay.

Muqdisho, 10 Marso 1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.

G. Sare Moxamed Sheekh Cosmaan

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 9.

Mogadiscio, li 21 Marzo 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 27 Agoosto 1974, L. 121.

Dhul gadatay Sacida Xaaji Diriye Xersi, ku fadhiya mq. 2.600. Kuna yaal Magaaladda Xamar - Jidka Afgooye.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kaacaanka iyo Xerka Lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeeduna ahayd 9 Jennayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Cali Moxamed Guled, taarikhdeeduna ahayd 28-8-1961, uu ku weydiisanayay dhul dhismo Dowlaadeed kuna yaal Muqdisho - Jidka Afgooye;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyay Xafiska ku shaqa lahaa, laguna dhaabacay xashida rasmiga ah ee Dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY Ogalansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lambarkeedu yahay 1110 bishi 26 Abril 1969 soona gudubtay fadhibgii III°aad ee 26 Agoosto 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsanayd naqshadda dhismaha lamb. 1649 ee 1° Abril 1974, laguna beddeley naqshadda lamb. yahay 1110, soona gudubtay fadhibii 17° aad ee 22 Maajo 1974;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tirakhdeedu tahay L. 20386 taarikhdeeduna ahayd 20-4-1971, in Jaalle Cali Moxamed Guled uu dhii-bay Xafiiska Canshuurta Dadban Lacag tiradeedu tahay Sh. So. 2.613, oo ah qimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay MWD-3-23-373 taarikhdeeduna ahayd 29 Maajo 1971 in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiya mq. 2.600, kuna yaal Muqdisho, Jidka Afgooye;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xofiiska sixadda L. 2719 taarikhdeeduna ahayd 27-6-1974, oo caddeyneysa dhismaha guriga Saciida Xaaji Diiriye (Hor. u lahaa Cali Moxamed Guled) oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hobsinada dhulka ay xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, oo waafaqsan dhismaha guriga taarikhdeeduna ahayd 3-8-1974;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 104 taarikhdeeduna ahayd 26 Dec. 1968, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L. 954 Vol. 19, oo lagu dhigay Notayaha Dott. Cosmaan Nuur Cali oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Jaalle Cali Moxamed Guled oo ka gadatay Jaalle Saciida Xaaji Diiriye Xersi — dhulka la mid ah mq. 2.600, kuna yaal Muqdisho — Jidka Afgooye;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi inu ka baxay kofka kor ku soo sheegnay;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciida Xaaji Diiriye Xersi la siiyay una gadatay dhulka ah mq. 2.600, kuna yaal Muqdisho — Jidka Afgooye.

Muqdisho, 27 Agosto, 1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.
G. Sare Moxamed Sheekh Cosmaan

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 37.

Mogadiscio, li 5 Settembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 27 Agoosto 1974, L. 122.

Dhul gatay Jaalle Ismaaciil Xaaji Maxamed Muuse, kuna yaal Muqdisho - Valle Nord - mq. 900.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadii koowaad iyo tii labaad ee Kaacaanka iyo Xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeeduna ahayd 9 Jennayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Maxamuud Guuleed, taarikhdeeduna ahayd 25-7-1965, uu u weydiisanayay dhul dhismo Dawladeed kuna yaal Muqdisho — Valle Nord;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka ee lagu dhejiyey Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna dhaabacay xashida rasmiga ah ee Dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY Ogalansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsanet naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 758 bishi 22 Feb. 1968, soona gudubtay fadhigii 4°aad ee 5-3-1968;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 108456 taarikhdeeduna ahayd 4-4-68, in Jaalle Maxamuud Maxamed Guuleed uu dhibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 450, oo ah qimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay WHG-372-387-68 taarikhdeeduna ahayd 6 Abril 1968, in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiya mq. 900, kuna yaal Muqdisho — Valle Nord;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismaha dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyo dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 4948 Reb. taarikhdeeduna ahayd 29kii Luulyo 1974, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L. 224 Atti Pubblici Vol. 65 — oo lagu dhigay Notayaha Dr. Muse Xusen Sadik oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Maxamuud Maxamed Guuleed oo ka gatay Jaalle Ismaaciil Xaaji Maxamed Muuse — dhulka la mid ah mq. 900, kuna yaal Muqdisho — Valle Nord;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ismaaciil Xaaji Maxamed Muuse la siiyay utuna gatay dhul Dawladeed ee ku fadhiyaa mq. 900, kuna yaal Muqdisho, Valle Nord.

Muqdisho, 27 Agoosto 1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.
G. Sare Moxamed Sheekh Cosmaan

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 34.

Mogadiscio, li 5 Settembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Tan. Col. ABDIULLAHI WARSAME NUR

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Cumar Maxamuud Weheliye u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 21-9-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyas trabesiyo 27; 24; 27; kuna fadhiya 688,50 mdh.

Soohdin:

Waqqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (sodden) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda. Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(250)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jibriil Cali Xuseen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 5- 9-72, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibus, oo leh qiyas rektangolar 35,50x9,50, kuna fadhiya 337,25 mdh.

Soohdin:

Waqqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Axmed Maxamuud.

Koofur waxaa ka xiga: Maxamed Saalax (Kushumbur).

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda. Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Cilmi Ceynaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 5-10-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyas rektangolaar 750x40, kuna fadhiya 3000 mdh.

Soohdin:

Waqqooyi waxaa ka xiga: Laoreha Maxamuud Caagane.

Koofur waxaa ka xiga: Cali Cumar Maxamed.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Ha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(232) Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faduma Cabdi Cabduraxmaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 13-8-67, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhigley, oo leh qiyas trabesiyo 31; 29; 19, kuna fadhiya 570 mdh.

Soohdin:

Waqqooyi waxaa ka xiga: Xaaji Maxamed Diirshe.

Koofur waxaa ka xiga: Cabdullahi Maxamed.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Shariif Calawi.

Bari waxaa ka xiga: Xawxa Kulane.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Ha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(233) Maxamed Cabdi Saciid

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO

DACWAD MADANI LAMBAR 1-74

Dacwoode — Xasan Cabdi Maxamed ka Horjeeda.

Dacweysane — Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Soomaalieed, Laanta Burco.

A M A R:

Ayadoo Dacwooduhu uu ku dhaartay inuu gubtay Buuga Keydsiga ee lambarkiisu yahay 1312-7 kuna qoran magaciisa taarikhdu markay ahayd 21-6-74 qiimihiisuna ahaa 700 shilin lacagtaas oo ahayd mid uu ku keydsade Bankiga Laanta Burco.

Ayadoo Bankiiga kaydsiga Laanta Burco ku soo sheegay warqada lambarkeedu yahay 003360 taarikhdu tahay 30-9-74.

Maxkamaddu waxay AMAR ku bixineysaa waxyalaaha soo socda:

1. In buugaas lumidiisa lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah (Official Bulletin).
2. In la siiyo lacagta ku qornayd buugaas oo tiradeedu ahayd 700 Soomaaliyeed ninka la yiraahdo Xasan Cabdi Maxamed markay dhammaato 30 casho faafinta ka dib.

Kharashkana waxaa qaba ninkaas buugu ka gubtay.

Burco, 1 Oktoobar 1974.

Cabdillaahi Dahir Bare
Guddoomiyaha Maxkamadda Togdheer

Ogg: Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Laanta Burco.
(234)

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Arji Lamb. 3-74.

Cali Xaaji Maxamed Axmed — Arjileh.
 iyoo

Bankiga Kaydka iyo Amaahda Soomaaliyeed dood celiye.

DIGRII

Cali Xasan Ismaciil wuu i hor yimi isaga oo ah Ninka haystay Buuga Keydka Lam. 648-7 Hadsigiisuna yahay So. Sh. 3,262,20 (Saddex kuna laba Boqol iyo laba iyo Lixdan Shilin iyo labaatan santi kali) waxu i tusay warqaddii Maamulaha Bankiga Kaydka iyo Ammahda, Laanta Hargeysa u ku cadeeyey in Buugga Kaydka ka lumay.

Waxaan halkan ku bixinaya Amarka Aniga oo cuskanaya qodobka 27 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 ee 9kii Sebtember 1965, Buugga ka-ydka lambarkiisu yahay 648-7 la tirtiri.

Waxaan Amar ku bixinaya:

- (A) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.
(B) Lacagta ah So. Sh. 3,262,20 Bankiga u celiyo Arjilaha 30 casho dabadeed marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
La qoray 20kii Juun 1974.

Xasan Xaaji Yusuf

Guddoomiyaha Maxkamadda

Gobolka ee Hargeysa

(235)

BOLIMOG S. p. A.

AVVISO DI CONVOCAZIONE
DI ASSEMBLEA GENERALE ORDINARIA

Il sottoscritto Mahamed Awale Libaan nella sua qualità di Presidente della Società Bolimog S. p. A., in nome e per conto del Consiglio di Amministrazione; visto l'art. 11 dello Statuto Sociale, in esecuzione alla delibera del Consiglio di Amministrazione del 7 ottobre 1974 - punto 4), con la presente avvisa i Signori Azionisti che è convocata l'Assemblea Generale Ordinaria per il giorno 28 novembre 1974 alle ore 18 in prima convocazione e per il giorno 10 dicembre alla stessa ora in seconda convocazione presso la sede in Mogadiscio — Corso Somalia, per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Presidente del Consiglio di Amministrazione;
2. — Discussione ed approvazione del bilancio dell'anno finanziario trascorso;
3. — Decisione in ordine alla remunerazione dei membri del Consiglio di Amministrazione;
4. — Decisione in ordine ai compensi dei componenti il Collegio Sindacale;
5. — Attività e prospettive della Bolimog;
6. — Varie ed eventuali.

Si rammena che ogni azionista ha diritto ad un voto per ogni azione posseduta e può farsi rappresentare con delega scritta da altra persona, anche non azionista purchè non sia Amministratore della Società o dipendente della stessa.

Il presente avviso viene a norma di Statuto, art. 10, pubblicato sul Bollettino Ufficiale della R. D. S. nei termini previsti.

Il Consiglio di Amministrazione, mentre ringrazia i Sigg. Azionisti per l'attenzione che vorranno riservare alla convocazione, sottolinea l'importanza della medesima per gli argomenti all'Ordine del Giorno e molto distintamente ossequia.

p. Il Consiglio di Amministrazione
IL PRESIDENTE
Mohamed Awale Libaan

(235 Bis)